

Ogaysiis- Sanadeedka Xubinta ee 2024



Xubinta Qaaliga ahow,

Waad ku mahadsantahay inaad xubin ka tahay Molina Healthcare. Waxaan aaminsannahay in qof kastaa u qalmo inuu dareemo sida ugu fican, waana sababta aan u bixinno faa'idooyinka fududeeya caafimaadka wanaagsan.

Ogeysiiskan Sanadlaha ah wuxuu kaa caawin doonaa inaad barato waxtarkaaga Molina Apple Health (Medicaid), iyo barnaamijyada iyo adeegyada aad ku heli karto si bilaash ah. Waxaan rabnaa inaan hubinno inaad ogaato sidaad u heli lahayd daryeelka aad ugu baahantahay baahiyaha daawaynta caafimaadkaaga jireed iyo dabeecadeedba (cillada maskaxda iyo si xun u isticmaalka maandooriyaha).

Markaad xubin ka tahay Molina, waxaad tahay qayb ka mid ah qorshayaasha Apple Health ee ugu sarreeya ee gobolka, #1 ee Xulashada Macmiilka¹ ee dadka iska diiwaangeliya Apple Health iyo #1 ee ku Qanacsanaanta Daryeel Bixiyaha².

¹ Xubnaha intooda badan doorta qorshahooda caafimaad bil kasta, waxay doortaan Molina.

² Iyada oo lagu saleynayo sahanka warbixinta qanacsanaanta bixiyaha ee kooxda saddexaad ee sanadlaha ah ee SPH Analytics (SPH), Molina waxa ay sii waddaa in ay kaga sarreyso tartamayaasha guud ahaan buundooyinka ku qanacsanaanta daryeel bixiyaha sanad ka sanad sida ku saleysan natijjooyinkii 2023.

Molina waxay siisaa xubnahayaga faa'idooyinkan gaarka ah iyada oo aan wax kharash ah laga



Indhagashi bilaash ah

Si heer sare ah u muuqo. Wax u arag qaab sii wanaagsan. Xubnaha Molina waxay hadda ka heli karaan muraayadaha indhaha oo bilaash ah Zenni Eyewear! Faa'idadan waxaa loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 21+.

Ka baadh in ka badan 55 qaab onlayn ah, oo ay ku jiraan muraayadaha bifocal-ka iyo kuwa wax soo dhaweeya. Iskugu day si fogaan ah. Muraayadahaagii aad dalbatay ayaa laguu keenay albaabkaaga!

Raac tallaabooyinkan fudud:

- Ka booqo molina.zennioptical.com kombiyuutar, moobeel ama tablet kaamira leh
- Xaqiiji macluumaadkaaga
- Adeegso Qalabka Isku-dayga Fogaanta ah ee Zenni
- Geli ama sawir ka qaad daawadaada
- Hel adiga dahaara daada aad ugu jeceshahay



Xubinnimada Naadiga Wiilasha & Gabdhaha

Molina waxay dabooshaa kharashka xubinimada sanadlaha ah ee xubnaha Apple Health, da'doodu tahay 6-18, ee ku jira Naadiyada Wiilasha & Gabdhaha ee Gobolka Washington. Ilmahaagu wuxuu helayaa:

- Gelitaanka naadiga ee saacadaha furan, dugsiga kadib, oo meelaha qaar ay furan yihiin goor dambe 7:30 galabnimo.
- Helitaanka Naadiga Xagaaga
- Barnaamijyada dugsiga ka dib ayaa diiradda lagu saaray qaab nololeedka caafimaadka qaba, jimicsiga iyo taageerada shaqada guriga
- Naadiyada intooda badani waxay bixiyaan cunto fudud ama cunto bilaash ah

- Naadiyada qaarkood ayaa laga yaabaa inay ku siiyaan gaadiid bilaash ah dugsiga ilmahaaga illaa Naadiga
- Iyo wax ka badan!

Booqo Naadiga Wiilasha & Gabdhaha ee xaafaddaada oo tus Kaarka Aqoonsiga Xubinta Molina si aad isu diiwaangeliso. Waxaa kale oo aad booqan kartaa Washingtonclubs.org/locations si aad u hesho naadi kuu dhow!

Ogoow: Manfacyada xubinnimada Naadiga Wiilasha & Gabdhaha waxay daboolaysaa kharashka xubinnimada sannadlaha ah oo keliya. Naadiyada qaarkood ayaa qiimeeya khidmadaha ka-qaybgalka bishii, kuwaas oo ah mas'uuliyadda xubinta. Deeq waxbarasho oo dheeri ah ayaa laga yaabaa in la helo, fadlan weydii Naadiga Wiilasha & Gabdhaha ee deegaankaaga.

Barnaamijka Abaalmarinta Xubinta



Ku hel illaa **\$200** sanadkii oo abaal-marin ah samaynta doorashooyin caafimaad qaba sida

helitaanka imtixaannada daryeelka wanaagsan, daryeelka uurka, iyo maaraynta caafimaadkaaga guud. Intaa waxaa dheer, hadda ayey ugu sahlantahay waligeed inaad hesho abaal-marinahaaga! Si aad wax badan u barato oo aad u aragto liiska adeegyada abaal-marinta lagu kasbado adiga iyo qoyskaaga, booqo MolinaHealthcare.com/WA-Medicaid-Wellness.

Abaalmarinnada caafimaadka waa la beddelaa ogeysiis la'aan. Xayiraado ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo.



CuntooyinLoo Naqshadeeyay Caafimaadka Meals – Molina

waxay siisaa cuntada FarmboxRx iyo adeegyada taageerada saarista ka dib xubnaha xaq u leh inta aad ka soo kabanayso ka dib joogitaanka isbitaalka:

- Illaa 28 cunto caafimaad leh oo uu sameeye kariye
- Laba cunto maalintii toddobaadkii, illaa laba toddobaad
- Cuntooyin tayo leh
- Cunto u diyaarsan in la cuno 2-3 daqiiqo gudahood
- Looma baahna diyaarin

Wixii macluumaad dheeri ah, kala hadal tababarahaaga Kala-guurka ee Molina.



Barnaamijka* Caawimada Taleefanka Casriga ah – Xubnaha

u qalma waxay helayaan qorshaha adeega gaarka ah ee Molina, bilaa lacag:

- Hadal Aan Xad Laheyn oo **BILAASH AH**
- Qoraal Aan Xad Laheyn oo **BILAASH AH**
- Wicitaan Caalami ah oo **BILAASH AH****

Molina waxay ku faantaa inay la wadaagto TruConnect barnaamijkan kaalmada.



Daryeelka degdegga ah ee fogaanta – Markaad u baahato

daryeel degdeg ah oo aadan tagi karin xafiiska bixiyahaaga, waxaad wali arki kartaa dhakhtarka boodhka haysta 24/7 iyada oo loo marayo telefoon ama muuqaal.

Daryeelka degdegga ah ee fogaanta ah waa kheyraad weyn oo loogu talagalay cudurrada fudud sida hargabka, caabuqa sanko, dhuun xanuun, isha casaanka ah iyo xasaasiyadaha.

Sameyso koonto oo kala hadal dhakhtarka barta:

Teladoc.com/MolinaWa

Ama wac (800) 835-2362 (TTY: 711).



App-ka moobeelka ee **My Molina** - La dag app-ka xubintayada macluumaadkaaga caafimaadna waxay ku jiri doonaan calaacasha gacantaada. Si fudud u hel bixiyeyaal cusub, arag kaarka aqoonsiga, iyo wax badan.



Ma doorbideysaa gelitaanka dagalka desktop-ka? Booqo MyMolina.com si aad u hesho sifooyinka la midka ah.



Molina Help Finder – U hel

caawimo raadinta agabyada adeegyada sida guryaha, tababarka shaqada, waxbarashada iyo wax sii badan. Booqo MolinaHelpFinder.com.

*Faa'idadan waxaa loogu talagalay xubnaha u qalma dheefaha Khadka Nololaha iyo Barnaamijka Isku xidhka La awoodi karo ee FCC (ACP).

**Waxa u gaar ah xubnaha Molina: Waddamada qaar waxaa ka mid ah Mexico, Canada, China, South Korea iyo Vietnam

Molina waxay siisaa xubnaha u gaarka ah caafimaadka habdhaqanka agabka farsamada

Molina waxay iskaashi la samaysaa dhowr bixiye telemedicine ah iyo aalado toos ah si ay kuu siiyaan daryeelka caafimaadka habdhaqanka tooska ah si badbaado iyo ammaan leh. Caawimaada fogaanta ah ayaa diyaar u ah daryeelka sida cunto xumada, xanuunka six un u isticmaalka opioid-ka iyo adeegyada daaweynta xanuunka isticmaalka muqaadaraadka. Wax badan ka baro ilahayeen Caafimaadka Dhaqanka iyo Soo kabashada barta MolinaHealthcare.com/MemberWA.



Teladoc Behavioral Health Virtual Care – Waxaad ka heli kartaa daawaynta qarsoon dhakhaatiirta cilmi nafsiga ee guddiga Teladoc, cilmu-nafsiga ama daaweeyayaasha shatiyeysan. U hel taageero walaaca, niyadda-jabka, murugada, dhibaatooyinka qoyska iyo wax ka badan, goobta aad dooratay.

Booqo Teladoc.com/MolinaWA ama wac (800) 835-2362 (TTY: 711).



App-ka Pyx Health (caawinta kalinimada iyo walaaca) – Qofna waa inuusan kaligiis marin caqabadaha nolasha. Taasi waa sababta aan u siino xubnaha app-ka Pyx Health. Ku roonow maalin kasta wehel iyo kaftan adoo adeegsanaya taageerada tignoolajiyada iyo shaqaalaha naxariista leh.

Isu diiwaangeli manta! Ka raadi “Pyx Health” gudaha Apple App Store ama Google Play. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo MolinaHealthcare.com/MemberWA.



App-ka BeMe (caawinta dhex mushaaxa shucuuraha) – BeMe waa app fayoobida caafimaadka dhimirka lagu dhisay dhalinyarada (da'da 13-19) maskaxda ku hay si ay u caawiyaan maaraynta dareenka iyo caqabadaha (tusaale, stress dugsiga, dhisidda isku kalsoonida, horumarinta caadooyinka caafimaadka leh, hagaajinta cilaaqaadka, iyo la qabsiga cagajuglaynta). App-ku wuxuu ku siin karaa tababar toos ah iyo taageero dhibaatooyinka, haddii loo baahdo.

Ka raadi app-ka “BeMe” Apple App Store-ka ama Google Play Store oo soo degso.



SCAN ME



Waxaad ku tiirsan kartaa Molina si aad u daryeesho naftaada oo dhan!

Faa'idooyinka hoose waxaa heli karaan dhammaan xubnaha Apple Health ee gobolka Washington.



Daryeelka Khabiirka oo ka socda bixiyeyaasha tayada sare leh shaqsi ahaan ama telehealth (taleefankaaga ama kombiyuutarkaaga-haddii adeegan uu bixiyo adeeg bixiyahaaga).



Maaraynta Daryeelka si loo taageero xubnaha qaba xaaladaha daba dheeraada ee u baahan caawimo dheeraad ah. Tani waxaa ka mid ah ka gudbida daryeelka ee meel kale iyo ka gudubka xabsiga.



Barnaamijyada iyo adeegyada gaarka ah oo diirada saaraya autism-ka, umusha khatarta sare leh, qalliinka bariatric iyo wax sii badan.



Adeegyada **LGBTQIA+ iyo Daryeelka Xaqiijinta Jinsiga** ee loogu talagalay in lagula dhaqmo xubnaheena si naxariis iyo ixtiraam leh annagoo ka caawinayna meesha laga saaro caqabadaha daryeelka iyo hubinta in dhammaan xubnuhu ay helaan taageero si ay u gaadhaan natiijooyin caafimaad oo wanaagsan, hadday ku jiraan socdaalkooda jinsiga ama helitaanka adeegyo dhaqan ahaan og oo ku habboon.



Adeegyada Dhibaatooyinka ayaa diyaar u ah inay caawiyaan qof dhaqankiisu khatar gelin karo naftiisa ama kuwa kale.

- Xidhiidhaha Dhibaatooyinka Gobolka
- Khadka Caawinta Soo kabashada ee Washington
- 988 Khadka Noloshaha ee Is-dilida & Dhibaatooyinka, wac ama qoraal u dir 988, ama la sheekeyso 988lifeline.org

Wixii xaalado degdeg ah, wac 911.



Khadka Talo-bixinta Kalkaalisada ee 24-saac oo loogu talagalay caafimaad oo u qalma kalkaalisada wakhti kasta. **(888) 275-8750** Ingiriisi iyo Luuqado Kale **(866) 648-3537** Isbaanish **TTY: 711** Dhagoolaha & Kuwa Maqalku ku Adagyahay



DentistLink wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho dhakhtarka ilkaha ee aqbala caymiska Apple Health.



Adeegyada Ka Hortagga ah si ay kaaga caawiyaan inaad si fiican ugu fiicnaato baadhitaanada muhiimka ah, daryeelka uurka, booqashooyinka daryeelka wanaagsan iyo wax ka badan.



Adeegyada Daawaynta Qallafsanaanta Isticmaalka Walaxyada oo ay ku jiraan bukaan-jiifka iyo daryeelka bukaan-socodka, maaraynta sarqaamidda (sun-saarista), iyo taageerada soo kabashada asxaabta.



Adeegyada caafimaadka dhimirka ee walaaca, niyad-jabka iyo guud ahaan wanaagga shucuureed.



Barnaamijyada Maamulka Caafimaadka iyo Waxbarashada si ay kaaga caawiyaan nolol caafimaad qabta. Barnaamijyada waxaa ka mid ah joojinta sigaarka, maaraynta miisaanka, la noolaanshaha niyad-jabka iyo wax ka badan.



Gaadiidka ballamaha caafimaadka iyo dhaqanka. Adeeggan waxa lagu daboolay Washington Apple Health iyo kaarka adeegyada ProviderOne.



Faa'idooyinka Farmasiga si ay kaaga caawiyaan inaad si wanaagsan dareento. Ka arag liiska daawooyinka la daboolay barta MolinaHealthcare.com.



Dib u buuxinta daawada ee 90-ka maalmood si loo yareeyo wakhtiga aad farmashiyaha ku aado. Hel 90-maalmood oo dib-u-buuxinta daawooyinka muddada-dheer qaarkood.



Adeegyada Turjumaada haddii aad doorbidayso inaad ku hadasho luuqad aan Ingiriisi ahayn. Turjubaano ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan.

Aan isku xidhnaano

Xubin Apple Health ahaan, mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad samayn karto ayaa ah inaad xogta xidhiidhkaaga ka dhigto mid casri ah. Tani waxay kaa caawineysaa inaad hubiso inaad awoodid inaad hesho daryeelka aad u baahantahay markaad u baahantahay. Waxaa kale oo ay kuu oggolaanaysaa inaad naga hesho warar iyo xasuusino muhiim ah.

Macluumaadkaaga xiriirka waxaa ka mid ah:

- Lambarkaaga telefoonka
- Cinwaankaaga iimaylka
- Cinwaankaaga boostada

Ka cusbooneysiis macluumaadkaaga xiriirka laba hay'adood oo caafimaad oo muhiim ah kuwaas oo u baahan kara inay ku soo gaaraan:

1. Molina Healthcare

- Wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165 (TTY 711) si aad u cusboonaysiiso dhammaan macluumaadka xidhiidhkaaga oo uu ku jiro ciwaankaaga boostada, ama booqo [MyMolina.com](https://www.molinahc.com)
- Waxaa kale oo aad ku cusboonaysiin kartaa lambarka taleefankaaga iyo iimaylka app-ka moobeelka ee My Molina

2. Washington Healthplanfinder

- Wac (855) 923-4633 (TTY: 855-627-9602), ama booqo [WAHealthPlanFinder.org](https://www.wahealthplanfinder.org) si aad u cusbooneysiiso dhammaan macluumaadka xidhiidhkaaga

Barnaamijkeena Hagaajinta Tayada (QI)

Barnaamijka QI ee Molina wuxuu si firfircoon u xaqiijiyaa in xubnaheenna iyo bixiyeyaashayadu adeegga ay haystaan agabka, qalabyada iyo macluumaadka loo baahanyahay si loo taageero natiijooyinka caafimaadka xubnaha ee la hagaajiyay.

Barnaamijka QI:

- Waxay hubisaa inaad geli karto koox caafimaad oo aqoon leh
- Waxay dib u eegtaa oo qaaddaa tallaabo haddii ay jirto arrin ku saabsan tayada daryeelka ee lagu siiyay
- Waxay ka jawaabtaa oo ay wax ka qabataa baahiyaha dhaqan iyo luuqad ahaanba kala duwan ee xubnaheena
- Waxay kor u qaaddaa badbaadada daryeelka caafimaadka xubnahayaga iyo bixiyayaasha
- Waxay ku qiimeysaa tayada daryeelka caafimaadka iyada oo loo marayo cabbirada [HEDIS®](#)
- Waxay ku ilaalisaa qanacsanaanta xubnaha xog-ururinada [CAHPS®](#)
- Waxay siisaa waxbarashada caafimaadka iyo agabka xubnaha sida:
 - [Hagaha Helida Daryeelka Caafimaadka tayada leh](#). Waxay u sharraxdaa xubnaha sida loo helo faa'idooyinka, barnaamijyada iyo adeegyada
 - [Hage Koritaan iyo Caafimaad Qabid](#). Waxay sharraxdaa nooca adeegyada loo baahanyahay iyo goorta ay tahay in la dhammaystiro
 - [Jidka Hagaha Fayo-dhowrka](#). Waxay siisaa khariidad boogashooyinka daryeelka caafimaadka ee muhiimka ah [carruurta](#) iyo [dadka waaweyn](#)
 - [Staying HealthyTips](#). Waxay wadaagtaa macluumaadka waxtarka leh ee maaraynta xaaladaha daba-dheeraada
 - [Wargeysyada Xubinta](#). Waxay bixisaa maqaallo waxbarasho caafimaad oo faa'iido leh



Haddii aad jeclaan lahayd inaad wax ka ogaato barnaamijyada iyo adeegyada Hormarinta Tayada Molina, booqo [MolinaHealthcare.com/WAQIProgram](https://www.molinahc.com/WAQIProgram).

Su'aalo?

Booqo [MolinaHealthcare.com](https://www.molinahc.com) Sidoo kale soo wac Adeegyad Xubinta lambarka (800) 869-7165 (TTY 711).

Si ay kaaga caawiyaan inaad nala xidhiidho, Molina waxay ku siinaysaa caawimo ay ku jiraan adeegyada turjubaanka, agab qoran oo far waaweyn ah, iyo qalab qoran oo afkaaga lagu turjumay oo qaabab kala duwan ah oo ay ku jiraan maqal, qaabab elektaroonig ah oo la heli karo iyo Braille.



Waa kuwan macluumaadka ku saabsan sidaad u heli lahayd daryeelka caafimaadkaaga jireed iyo dabeecadeed:

1. Wac PCP-gaaga iyo Bixiyaha Caafimaadka Dhaqanka

PCP waxay u taagantahay bixiyaha daryeelka aasaasiga ah. PCP-gaaga waa adeeg bixiyahaaga gaarka ah. PCP-gaaga wuxuu dabooli doonaa inta badan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ee caadiga ah; dib u eegaa natiijoyinkaaga baadhitaannada, kuu qoraa daawooyinka, oo kuu gudbiya bixiyayaasha kale (takhasuslayaasha), haddii loo baahdo. Bixiyahaaga caafimaadka habdhaqanka ayaa daryeeli doona caafimaadkaaga dhimirka iyo/ama daawaynta iyo daawaynta khamriga.

Waxaad waydiin kartaa bixiyayaasha haddii ay bixiyaan telehealth (daryeelka taleefoonka ama muuqaalka). Molina waxay dabooshaa adeegyada caafimaadka haddii uu bixiyo adeeg bixiyahaaga.

Haddii aadan haysan bixiye ama aad u baahan tahay inaad beddesho PCP-gaaga, booqo MolinaProviderDirectory.com/WA ama wac Adeegyada Xubnaha (800) 869 -7165 (TTY: 711).

Haddii aad u baahantahay inaad hesho farmashi kuu dhow, tag: MolinaProviderDirectory.com/WA. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsandaawooyinkaaga dhakhtar qoray, wac Adeegyada Xubnaha (800) 869-7165 (TTY: 711).

Haddii aad wajaheyso dhibaato caafimaadka dhimirka ah, [wac ama qoraal u dir 988](#), ama la xidhiidh [khadkaaga dhibaatooyinka deegaanka](#).

Wixii xaalado degdeg ah, wac 911.

2. La hadal Wakiilka Molina

Wakiillada Adeegga Xubinkayaga ayaa ka jawaabi kara su'aalaha ku saabsan qorshahaaga ama caymiskaaga dawada, ku siin karaan macluumaadka caafimaadka, kaa caawin doona inaad hesho bixiye iyo wax ka badan.

Adeegyada Xubinta: (800) 869-7165 711, furan Isniinta illaa Jimcaha, 7:30 subaxnimo illaa 6:30 galabnimo. (PT).

Si aad u waydiiso su'aalo ku saabsan u-qalmitaankaaga Apple Health ama si aad u hesho caawimo dib u cusboonaysiinta caymiska caafimaadkaaga la xidhiidh:

- Adeegga Macmiilka ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington: (800) 562-3022, TRS 711
- Washington Healthplanfinder barta (855) 923-4633, (TTY: 711) ama booqo WaHealthPlanFinder.org

Haddii aad hayso su'aalo gaar ah oo la xidhiidha dheefaha xubinta Molina, fadlan kala xidhiidh Adeegyada Xubinta Molina barta (800) 869-7165 (TTY: 711) ama booqo MolinaHealthcare.com.

3. Akhri dukumintiyada muhiimka ah

Akhri [Ogaysiiska Dhaqanada Asturnaanta](#) si aad u fahanto sida Molina u ilaaliso asturnaantaada.

Ka akhri Buug-gacmeedkaaga Xubinta barta MolinaHealthcare.com/IMCHandbook si aad u fahanto faa'idooyinkaaga iyo sida loo helo daryeelka aad u baahantahay.

Si aad u codsato dukumeentiyadan ama macluumaadka xubinta Molina oo luuqad ama qaab kale ah, fadlan wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165 (TTY: 711).

Buug-gacmeedkaaga xubinta ayaa wax kaaga sheegaya:

- Faa'idooyinka la daboolay iyo kuwa aan la daboolin
- Sida loo helo adeegyada caafimaadka dhimirka
- Sida loo helo adeegyada daaweynta dhibaatooyinka isticmaalka muqaadaraadka
- Waxa la sameeyo haddii aad hesho biil
- Sida loo helo caawimo haddii aad ku hadasho luuqad aan Ingiriisi ahayn ama haddii aad u baahantahay inaad ku hesho isgaadhsiin qaab ka duwan sida cod, qaabab elektaroonig ah oo la heli karo ama Braille
- Sida loo helo xaqiiqooyinka bixiyeyaasha qandaraaska kula jira Molina
- Sida loo helo takhasus, caafimaadka dhimirka iyo daryeelka isbitaalka
- Sida cabasho loo gudbiyo
- Sida Molina dib u eegto tignoolajiyada cusub
- Awaamiirta hore ee daryeelka ee gelinaysa doorashooyinkaaga daryeelka caafimaadka jidhka iyo maskaxda qoraal bixiyahaaga iyo qoyskaaga
- Adeegyada la heli karo si ay gacan uga geystaan maaraynta xaaladaha daba dheeraada
- Xuquuqahaaga iyo Waajibaadyadaada Xubineed
- Qorshaha iyo Barnaamijka Horumarinta Tayada Molina
- Faa'idooyinka daawada lagu qoray
- Faa'idooyinka ka baxsan aagga iyo sida loo helo daryeel
- Sida loo galo tusaha bixiyaha
- Sida loo helo daryeelka aasaasiga ah
- Sida loo helo xaalad degdeg ah, saacadaha shaqada ka dib ah iyo daryeelka meel ka baxsan
- Sida racfaan looga qaato go'aanka ku saabsan dheefahaaga
- Sida iyo goorta lagu heli karo adeegyada maaraynta kiiska
- Sida Molina lacag u siiso bixiyeyaasha
- Sida loo soo sheego khayaanada daryeelka caafimaadka, qashinka ama xadgudubka

Waad ku mahadsantahay inaad xubin ka tahay Molina. Waxaan rajeyneynaa inaan kuu adeegno.

Caafimaad Wanaagsan,

Molina Healthcare

[Luuqadda Takoor La'aanta](#)

